

Barnaamijka Tababarka Saraakiisha Yaryar ee Keydka Ciidama Cirka (AFJROTC)

Horumarinta waddaninyiin u taagan adeegga waddankooda iyo bulshadooda

Koorsooyinka Barnaamijka Guud

Cilmiga Diyaaradaha (40%)	Waxbarashada Dhinaca Hoggaanka (40%)
<p>Cilmiga Diyaaraduhu wuxuu ardayda siinayaa waxbarasho ku saabsan bay'ada duullimaadyada iyo diyaaradaha. Waxay ardaydu baranayaan habka diyaaraduhu u shaqeeyaan iyo jahooyinka, taariikhda duullimaadka, waxyaabaha looga baahanyahay bani aadamka marka laga hadlayo duullimaadka, dhaqamada caalamiga ah, juquraafiga, dayax-gacmeedka iyo barnaamijyada la hal-maala, tignoolajiyada, gantaalaha, iyo horumarka la xiriira duullimaadyada.</p>	<p>Waxbarashada dhinaca hoggaanka waxay qeyb ka tahay manhajka barnaamijka AFJROTC ee horumarinaya xirfadaha hoggaanka si ardaydu u helaan khibrad dhab ah oo ku salaysan nolosha. Waxbarashadan dhinaca hoggaanka ah waxay diiradda saaraysaa masuuliyadda, hoggaaminta, waddanimada, habdhaqamada, ficillada ardayda, maamulka wakhtiga, raadinta xirfadaha shaqooyin, barashada dhaqaalaha, xiriirka, iyo xafladaha.</p>
<p>Koorsooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none">• Maamulka Ciidanka• Badbaadada• Cilmiga Duullimaadyada: Taariikhda Duullimaadka Diyaaradaha• Baaritaanka la xiriira: Dayax-gacmeedka• Barashada Dhaqamada	<p>Koorsooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none">• Barashada Hoggaanka 100: Dhaqamada iyo asaaska wadanimada• Barashada Hoggaanka 200: Xirfadaha Xiriirka• Barashada Hoggaanka 300: Xirfadaha Nolosha iyo diyaar-garowga• Barashada Hoggaanka 400: Asaaska Maamulka• Barashada Hoggaanka 500: Gaardiska iyo Xafladaha
<h3>Barnaamijka Jir dhiska (20%)</h3>	
<p>Jir dhisku waa qayb muhiim ah oo kamid ah barnaamijka Air Force Junior ROTC. Ujeedada laga leeyahay jir dhiska waa in ardayda lagu dhiirri galiyo inay helaan caafimaad islamarkaana ay la yimaadaan shuruudaha looga baahanyahay barnaamijka.</p> <p>Barnaamijka jir dhisku wuxuu ka koobanyahay labo qeybood oo diiradda llagu saarayo barnaamijka horumarineed oo qof walba gaarka u ah iyadoo la beegsanayo heerka qaran ee waddankoo dhan oo ku salaysan da'da iyo jinsiga qofka. Ardaydu waxay dhaqan galin doonaan barnaamijka jir dhiska ee ay ku barten koorsada Leadership Education 100, waxaana hawlahaas ka mid ah, isboortiga kooxaha, si barnaamijka jir dhisku u noqdo mid xiiso badan. Ardayda sameysa horumar dhinaca jir dhiska ah waxay helayaan Wellness Ribbon ama Abaal-marin dhinaca Jir Dhiska ah. Fitness Award.</p>	

Barnaamijka Tababarka Saraakiisha Yaryar ee Keydka Ciidama Cirka (AFJROTC)

Horumarinta waddaninyiin u taagan adeegga waddankooda iyo bulshadooda

Wax ka badan Khibrada Fasalka! Ardaydu waxay ka qeybqaadanayaan waxyaabo badan oo ka baxsan koorsooyinka fasalka. Waxay dhex joogayaan iskuulladooda iyo bulshadooda iyagoo samaynaya **kooxo khaas ah**, sida Tijaabada, Tababarka dhinaca Jirka, kooxo dharka yunifoomba ah qaba oo adeegyada bulshada sameeya; iyagoo ka qaybgalaya safarrada gaagaaban ee loo yaqaanno **Curriculum in Action**.